www.somalilandlaw.com

Doorashada dadban 2006

XEERKA XULASHADA GOLAHA GUURTIDA

Qod: 1 aad

Eray bixin

"Musharax" waxaa loola jeedaa xubinta beeshiisu u soo jeediso in loo xulo xubinimada Golaha Guurtida.

"Xilli xeer-dejin" waxaa loola jeedaa muddada xilka Golaha Guurtida ee Qod:58 (2) Dastuurka tilmaamay.

"Guddiga` waxaa loola jeedaa Guddiga Doorashooyinka Qaranka (NEC)

Qod: 2 aad

Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabayaa Xeerka Xulashada Golaha Guurtida ee xilliga xeer-dejinta labaad ee sanadaha 2006- 2012

Qod: 3 aad

Tirada Xubnaha la soo xulayo

Sida ku tilmaaman Qod: 60 (1) Dastuurka, tirada xubnaha Golaha Guurtida ee la soo xulayaa waa 82 xubnood.

Qod: 4 aad

Qaybinta kuraasta Golaha

Inta laga gaadhayo doorasho toos ah, waxaa kuraasta Golaha guurtida lagu qaybinayaa qaab saamiyeedka beelaha Somaliland ee kuraasta Golaha guurtida ku yimi xilligii xeer-dejinta kowaad ee Golaha Guurtida 1997- 2006.

Qod: 5 aad

Muddada Xilka Golaha

Muddada xilka Golaha Guurtidu waa (6) lix sano oo ka bilaabanaysa maalinta fadhiga ugu horeeyaa u qabsoomo sida ku tilmaaman Qod: 58(2) Dastuurka.

www.somalilandlaw.com

Qod: 6aad

Shuruudaha xubinta loo xulayo Golaha Guurtida

1) Ka sokow shurruudaha ku tilmaaman qod: 58 ee Dastuurka oo lala akhriyo Qod: 41 Dastuurka, qofka loo xulayo xubinimada Golaha guurtida waxaa laga rabaa shuruudahan:

(a) waa in aanu xubin ka ahayn xisbi siyaasadeed, haddii uu ka yahayna waa in uu xisbigaas kala yimaadaa cadayn qoraal ah in uu ka baxay ka hor ku dhawaaqida muddada xulista.
(b) Waa in aanu ahayn shaqaale Dawladeed, haddii uu ahaana waa in uu cadayn shaqo ka tegis ka haystaa hay'adii dawladeed ee uu u shaqaynayay ka hor ku dhawaaqista taariikhada xulista.

Qod: 7 aad

Waajibaadka xubinta isu sharaxaysa xubinimada Guurtida.

Qofka isu soo sharaxaya in xubin ka noqdo xulashada Guurtida waxaa laga rabaa:

a) In uu la yimaado cadayn denbi la'aan
b) In uu la yimaado cadayn caafimaad qab
c) In uu la yimaado cadayn in aan wax cashuur ah lagu lahayn
d) In uu la yimaado cadayn bixin deebaajiga xulista oo dhan 1,200, 000 Sl Sh. Ah
e) Afar sawir oo kur ah.

Qod: 8 aad

Habka Maamulka soo xulista xubnaha Golaha Guurtida

Habka maamulka soo xulista xubnaha Golaha Guurtida waxaa fulinaya Guddiga Doorashooyinka Qaranka (NEC), waxaana hawlahooda ka mida:

(a) Cayimaada waqtiga xulista iyo dejinta jadwalka xulista
(b) Hubinta shuruudaha xubnaha la xulayo
(c) Go'aan ka gaadhista khilaafaadka soo xulista xubnaha
(d) Ku dhawaaqida liiska hor-dhac ah ee xubnaha Golaha Guurtida.

Qod: 9 aad

Xilliga xulista xubnaha

Guddiga doorashooyinka ayaa cayimaya waqtiga soo gudbinta liisaska musharaxiinta ugu yaraan afar bilood ka hor dhammaadka xilliga guurtida,waxaana xeerku soo saaraya madaxweynaha.

www.somalilandlaw.com

Qod: 10 aad

Soo sharaxaada xubnaha loo xulayo Golaha guurtida

1. Xubnaha musharaxiinta loo xulayo Golaha Guurtida, liiska beel walba, waxaa Guddiga Doorashooyinka u soo gudbinaya madax-dhaqameedada beelaha.
2. Liis waliba waa in ay ku qoraadaan magacyada musharaxiinta oo afaran, waana in uu saxeexan yahay
3. Madax-dhaqameedyada faqrada hore ee qodobkan xeerkan dhexdiisa waxaa loola jeedaa iyadoon wax loo dhimayn nuxurka xeerarka kale. Suldaamada, Garaadada, Ugaasyada iyo Boqorada beelaha oo ah kuwii jiray ka hor Diisember 2005.
4. Beesha aan lahayn madax-dhaqameedka ku xusan faqrada hore qodobkan waxaa liiska xubnahooda musharaxiinta ah u soo gudbinaya Caaqilka guud ee beesha.

Qod: 11 aad

Soo gudbinta liistooyinka musharaxiinta

1- Beelaha leh laba madax-dhaqameed iyo in ka badan, markay dhaqan hoosaaskooda wax ku qaybsadaan, waxay Guddiga u soo gudbinayaa hal liis oo midaysan oo ay dhammaan madax-dhaqameedadu soo wada saxeexeen.
2- Haddii ay jiraan laba liis iyo wax ka badan ama liisas madax dhaqameedyadu isku khilaafsan yihiin, Guddiga Doorashooyinka waxay marka hore dhinacyada is khilaafsan u qabanaysaa fadhi dhexdhexaadin iyo isu soo dhowayn.
3- Haddii fadhigaa Guddiga u qabatay beesha is khilaaftay ay suurtogeli waydo in ay ku heshiiyaan hal liis oo midaysan.

Guddigu waxay liisaska loo soo gudbiayay ka soo dhex xulaysaa hal liis oo keliya oo ay ka xushaan xubnihii madax-dhaqameedyada is khilaafsani u soo kala gudbiyeen.

4- Liiskaa Guddigu soo xushay ayaana noqonaya xubnaha beeshaa ee Golaha Guurtida loo xulayo, iyagoo ku salaynaya dhaqan wax qaybsiga beeshaas.
5- Dhamaan liisaska beeluhu u gudbinayaa Guddiga waa in ay ku dhamaystiran yihiin shuruudaha iyo waajibaadyada xeerkani tilmaamay.

Qod: 12 aad

Xulista Xubnaha

1. Marka Guddigu hesho dhammaan liiska musharaxiinta beelaha, waxay xubin xubin ugu eegayaan in xubnaha musharaxiinta ahi buuxiyeen shuruudaha iyo waajibaadka xeerkan ku tilmaaman.
2. Xubinta buuxin wayda shuruudaha iyo waajibaadka kor ku xusan, waxay Guddigu dib ugu celinaysaa beeshii soo sharaxatay, iyagoo siinaya waqti cayiman oo ay ku soo bedeshaan.

www.somalilandlaw.com

3. Muddadaas cayiman dhexdeeda waa in beeshu ku soo gudbiso bedelka xubintii ama xubnihii dib loogu soo celiyay oo shuruudaha iyo waajibaadka xeerkan ku xusani u dhamaystiran yihiin.

Qod: 13 aad

Ku dhawaaqista liiska xubnaha loo xulay Golaha Guurtida

1. Guddiga Doorashooyinka qaranka (NEC) markay:

   (a) Hubiyaan in liisaskii beeluhu dhamaystiran yihiin
   (b) Hubiyaan in dhammaan xubnaha musharaxiinta ahi shuruudihii xeerka buuxiyeen.
   (c) Go'aan ka gaadhaan dhammaan cabashooyinka iyo khilaafyada soo gaadhay haday jiraan.

2. Guddigu waxay ku dhawaaqayaan liiska hor dhaca ah ee xubnaha loo xulay Golaha Guurtida ugu yaraan laba bilood ka hor dhammaadka xiliga Golaha Guurtida.
3. Guddigu markay ku dhawaaqdo liiska hor-dhaca ah ee xubnaha loo xulay Golaha Guurtida waxay daahid la'aan ugu gudbinyaan Maxkamkada sare Go'aanka lagu dhawaaqay oo ay la socoto. wixii go'aan ah ay ka gaadheen cabashooyinka iyo khilaafyada soo gaadhay (hadday jiraan) iyo nuqulkii liisaskii madax-dhaqameedyada beeluhu soo gudbiyeen.

Qod: 14 aad

Cabashada Go'aamada Guddiga

1. Go'aamada Guddiga Doorashooyinka waxaa looga caban karaa Maxkamada Sare
2. Qoraalka Cabashada oo sababaysan waa in loogu gudbiyaa Maxkamada Sare muddo (10) toban casho gudahood ah oo ka bilaabanta maalinta Guddigu ku dhawaaqay liiska xubnaha loo xulay Golaha guurtida.

www.somalilandlaw.com

Qod; 15 aad

Xaqa cabashada

1. Cabashada la xidhiidha xulista waxaa guddiga u soo gudbin kara cida xaqa xulista leh ee isku khilaafsan.
2. Waxaa kaloo Guddiga dacwad u gudbin kara xubin go'aanka guddiga ka soo baxay uu saameeyay oo aan ku jirin liiska khilaafka faqrada hore ka taagan yahay.
3. Dhinacyada faqradaha hore ee qodobkan ayaa xaq u leh in go'aanka Guddiga Maxkamada Sare uga cawdaan.

Qod: 16 aad

Go'aaminta cabashooyinka iyo ku dhawaaqida liiska kama danbaysta

1. Maxkamada Sare fadhi buuxa oo dhinacyada ay khusayso ay ku dhegaysatay waxay kaga go'aan gaadhaysaa wixii cabashooyin lid ku ah go'aamada Guddiga doorashooyinka ee loo soo gudbiyo.
2. Maxkamada Sare markay:

   (a) Go'aan ka gaadho cabashooyinka go'aamada Guddiga ee ku soo gaadhay waqtiga ku xusan qodobka 14 aad.
   (b) Hubiso shuruudihii iyo hab-raacii sharcigan in la dhamaystiray.

3. waxay ku dhawaaqaysaa liiska xubnaha Guurtida ee kama danbaysta ah.

Qod: 17 aad

Isugu yeedhista & Dhaarinta mudanayaasha

1. M/waynuhu wuxuu isugu yeedhayaa xubnaha Golaha la soo xulay 30 casho gudahood, laga bilaabo maalintii liiska kama danbaysta ah Maxkamada Sare ku dhawaaqday.

www.somalilandlaw.com

2. Haddii m/waynuhu isugu yeedhi waayo Golaha cusub, mudada faqrada hore, Golaha la soo xulay wuxuu iskii u kulmayaa maalinta 45 aad laga bilaabo maalinta liiska kama danbaysta ah Maxkamada sare ku dhawaaqday.
3. Fadhiga ugu horeeya xubnaha Golaha Guurtida ee la soo xulay waxaa furaya Gudoomiyaha Maxkamada Sare oo ku dhaarinaya dhaarta Dastuurka mudanayaasha Golaha cusub.
4. Markay dhaartin mudanayaashu dhammaato, isla fadhigaa Golaha waxaa Gudoominaya xubinta ugu da` wayn inta isla fadhigaa goluhu ku dooranayo gudoomiye iyo laba gudoomiye ku xigeen.

Qod: 18 aad

Buuxinta Jagada banaanaatay

Haddii jagada xubinimada guurtidu u banaanaato sababaha ku xusan qodobka 68(2) Dastuurka, waxaa loo soo buuxinayaa qaab la mid ah kii lagu soo xushay.

Qod: 19 aad

Dhaqan galka xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa 15 casho gudahood marka Golayaashu ansixiyaan M/waynuhuna saxeexo.